

# Daraasadda Jinsiga ee Hannaanka Doorashooyinka Puntland



PHOTO PDRC

Oktoobar 25, 2021 Puntland waxa ay noqotay maamul-goboleedkii ugu horreeyay ee xubin ka ah dawladda federaalka Soomaaliya oo si dimuqraaddi ah u hirgesha doorashooyinka goleyaasha degaanka. Saddexda degmo ee Eyl, Uffeyn iyo Qardho waxaa ka dhacay doorashooyin hal qof iyo hal cod ah (OPOV). Ahmiyadda taariikhiga ah ee ay leeyihiiin ka sokow, doorashooyinkan waxa la socda waayo-aragnimo muhiim ah iyo casharro badan oo laga baran karo, oo ay ka mid tahay xoojinta sinnaanta jinsiga iyo ka-qaybgalka siyaasadda ee haweenka.

Iyada oo kaashanaysa Akadeemiyada Folke Bernadotte (FBA), hay'adda Horumarinta & Cilmi-baarista Puntland (PDRC) waxa ay daraasad ku saabsan ka qaybgalka haweenka ee doorashooyinka ka samaysay doorashadii ka dhacday saddexda degmo. Ujeeddada daraasadda jinsigu waxa ay ahayd in la ururiyo caqabadaha iyo weliba arrimaha wax ku biirinaya xoojinta sinnaanta jinsiga. Natijada daraasadda waxa lagu soo ururiyey warbixin loogu magac daray Daraasadda Jinsiga ee Hannaanka Doorashooyinka ee Maamulka Puntland ee xubin ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya (*Gender Assessment of the Electoral Process in the Puntland Federal State of Somalia*), waxana qoraalkan lagu soo koobayaa natijjooyinkii ugu waaweynaa iyo taloooyinkii muhiimka ahaa ee ka soo baxay daraasadda. Natijjooyinkan waxa ay ahmiyad u leeyihiiin horumarinta sinnaanta jinsiga ee doorashooyinka soo socda, ma aha Puntland oo keliya, balse sidoo kale maamullada kale ee xubnaha ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya, taas oo dadaalka Puntland ugu jirto hannaanka dimuqraaddiyaddu u noqon karo dhiirigelin iyo ku-dayasho.



Puntland  
Development &  
Research Center



# *Natiijooyinka iyo Talooyinka Daraasadda*

## **Xaaladda Dhaqan iyo Tan Sharci**

Doorashadii dawladaha hoose ee 2021 waxa ay ahayd tallaabo weyn oo loo qaaday gaarista mataaladda haweenka, maaddaama ay gaarsiisay mataaladda haweenka ku dhawaad 30% saddexda degmo ee ay doorashadu ka dhacday, marka loo bar-bar dhigo heerkii 15% ee ay ahayd doorashada ka hor. Mid ka mid ah arrimaha sababay kororkan waxa uu ahaa Habraaca Ka qaybgalka Haweenka iyo Dadka Nugul ee Doorashooyinka Golayaasha Degaanka ee Puntland ee uu diyaariiyey Guddiga ku-meel-gaarka ah ee Doorashooyinka Puntland (TPEC). Tilmaamahan waxa uu suuragashay in tiro badan oo musharraxiin kala duwan ay ka soo baxaan qaar ka mid ah ururrada siyaasadda. Si kastaba ha ahaatee, Puntland waxa weli ka dhiman in si buuxda loo dhaqan-gesho shuruucda la xiriirta qoondada jinsiga, taas oo sabab u noqon karta in tixgelin la siin waayo sinnaanta jinsiga marka la gaaro doorashooyinka soo socda.

### **Talooyin:**

- In shuruucda doorashooyinka Puntland lagu dhaqan-gesho saamiga "hal saddexdiiba".
- In la xaqijiyo in ururrada siyaasaddu fahansan yihiin, oo waafaqaan qoondada sharciga ah, isla markaana ay dib u ceshaan ama diidaan liisaska aan waafaqsanayn.

## **Maamulka Doorashada**

Intii uu isu diyaarinayay doorashooyinka 2021, guddiga TPEC waxa uu xoogga saaray sinnaanta jinsiga iyo ka-qaybgalka doorashada ee kooxaha la hayb sooco marka laga hadlo qaab-dhismeedkiisa guddi ahaan iyo weliba adeegga uu u hayo ummadda. Si kastaba ha ahaatee, waxa jira qaybo ka mid ah Tilmaamayaasha Sinnaanta Jinsiga iyo Ka-qaybgalka Bulshada oo u baahan in la dhaqan-gesho, sida siyaasadda lidka ku ah takoorka iyo dhibaataynta xad-gudubka ah (zero-tolerance policy for discrimination and harassment), abuurista Guddiga Isku-dubbaridka Sinnaanta Jinsiga iyo Ka-qaybgalka Bulshada, iyo nidaam habeysan oo lagu taabba-gesho ka qaybgalka jinsiga ee hawlaha kale ee ka socda bulshada dhaxdeeda.

Page 2 (2)

### **Talooyin:**

- TPEC waa in ay joogteyso dabagalka iyo la-socoshada guulaha laga gaaro yoolalka lagu asteeyey doorashooyinkii 2021, dhanka sinnaanta jinsiga, gaar ahaan hababka gudaha ururka, fursadaha iyo hababka shaqaaleynata.
- TPEC waa in ay ururiso xogta la xiriirta jinsiga ee dhammaan hawlaha ka baxsan ururka, marka lagu daro tirada dadka u soo baxa inay codeeyaan, si ay xogtaas ugu isticmaasho qorshaynta hawlaha.

## **Ururrada Siyaasada iyo Xisbiyada**

Jiritaanka ururro siyaasadeed waxa ay wanaajisay in haweenku ka muuqdaan siyaasadda heer ka wanaagsan marka loo eego hannaankii hore ee ku dhisnaa habka qabiilka. Saddexdii doorasho ee hordhaca ahaa, 29% musharraxiintu waxa ay ahaayeen haween (147 ka mid ah 449-ka musharrax). Haweenkan waxa ay matalayeen siddeed urur siyaasadeed oo kala duwan, waxayna u tartamayeen 87 kursi. Marka la eego ururrada siyaasadeed ee Puntland, xilalka ay haweenku hayaan waxa ay u dhaxaysaa 22% ilaa 30%, hase yeeshi ma jiro urur siyaasadeed ay qof dumar ahi guddoomiye u tahay.



Guud ahaan marka loo eego, ka qayb gal ka haweenka ee ururradu waa yar yahay, waxana sabab u ah arrimaha ay ka mid yihiin dhaqaale la'aan, dhaqanka soo-jireenka ah, ragga oo xilalka wada buuxsha, ururada oo marmarsiyo ka dhigta inay waayeen tiro musharraxiin dumar ah oo ku filan, iyo jiritaan la'aan qoondo haween oo sharci ah. Marka la eego xaaladda jirta, Tilmaamaha Sinnaanta Jinsiga iyo Ka qaybgalka Bulshada ee ay diyaarisay TPEC ayaa gacan weyn ka geystay in ururradu soo magacaabaan ku dhawaad saddex meelood meel dumar ah oo u sharraxan liistada xiran.

#### **Talooyin:**

- In dib-u-eegis lagu sameeyo habraacyada iyo siyaasadaha u deggan ururradu siyaasadda, dokumentiyada saldhigga u ah iyo xeerarka qeexaya xubinnimada ururka si loo xoojiyo in heerarka kala duwan ee ururradu yeeshaan ka qayb-gal iyo fursado loo siman yahay (xubnaha, madaxda, musharrixiinta).
- Ixtiraam iyo dhaqangelin buuxda oo ku dheehan sharci dhammaan tallaabooyinka la xiriira kor u qaadidda ka qayb-galka haweenka iyo ku darista liisaska musharraxiinta.
- Sare u qaadista dowlka ururradu ku leeyihii kor u qaadista wacyiga, awoodda waxqabad iyo dhaqaale lagu taageerayo dhammaan xubnaha iyo musharraxiinta, gaar ahaan haweenka iyo kooxaha dumarka iyo ragga aan inta badan ka muuqan siyaasadda.
- Hubinta in musharraxiinta dumarku helaan taageero maaliyadeed oo ku filan iyo fursado ololeyn bulshada dhexdeeda.
- Ururradu waxa ay magacaabi karaan xilal gaar ah oo ay haweenka musharriintu hiigsan karaan sida u-tartanka duqa magaalada.

#### **Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha iyo Maalinta Cod-bixinta**

Iyada oo kaashanaysa bulshada rayidka ah, TPEC waxa ay samaysay wacyigelin baabsan oo lagu taageerayo diiwaangelinta haweenka. Dumarku waxa ay ahaayeen in ka badan kala bar 48,535 codbixiyayaashii is diiwaangeshay. Hase ahaatee, diiwaan-gelinta dadka reer

guuraaga ah oo yareyd, una badan rag, ayaa janjeerin karta xogta diiwaangelinta. Marka la eego goobaha codbixinta, shaqaalaha dumarku waxa ay dhamayeen 31%, balse qaar ka mid ah goobaha codbixintu waxa ay lahaayeen guddoomiyayaal dumar ah, tiro ahaanna dhan 5% oo qura.

Muddadii ay daraasaddu socotay waxa muuqatay in tiro badan oo dumar ah u soo baxeen inay codeeyaan, laakiin lama hayo xog faah-faahsan oo ku saabsan saamiga jinsiga codbixiyayaasha, taas oo macnaheedu yahay in aragtidan aan la xaqijin karin. Wareysiyada ay daraasaddu qaadday waxa ay muujinayaan jahawareer la xiriira nidaamka doorashada ee liiska xiran, waxa ayna tilmaamayaan jiritaanka eex iyo cadaadis ka yimid dhanka beelaha. Wuxuu jirey codbixiyayaal fara badan, gaar ahaan haween, oo aan waxna akhriyin, waxna qorin, una baahday gacan markii ay codkooda dhiibanayeen. Arrintan waxa ay waxyeello ku noqotay sirta codbixinta. Intaa waxa dheer, jawiga oo kululaa iyo safafka oo dhaa-dheeraa ayaa halis caafimaad ku keenay qaar ka mid ah codbixiyayaasha, sida dadka waayeelka ah iyo waalidka watay ilmo yaryar.

#### **Talooyin:**

- Joogteynta tababbarrada codbixiyayaasha, sida isticmaalka calaamadaha, waraaqaha codbixinta iyo liisaska xiran iyo tababbaro lala beegsanayo kooxaha aan lahayn matalaad buuxda, oo ay ku jiraan haweenku.
- Adeegsiga qorshayaal tababbar ku habboon dadka aan wax akhrin karin.
- Kordhintu tirada shaqaalaha haweenka ee ka hawlgala goobaha codbixinta, iyada oo la hubinayo sinnaanta jinsi ee dowrarka hoggaaminta goobaha codbixinta.

## **Caqabadaha Dhaqaale iyo Kuwa Bulsho**

Warbixintu waxa ay astaysay in dhaqaale yaraantu saameyn ku leedahay awoodda haweenku ku sameyn karaan obole siyaasadeed, xulafo siyaasadeed kula sameysan karaan jilayaasha siyaasadda ama hoggaamiyeysaasha bulshada, kuna qaban karaan wacyigelin dadweyne. Dhanka kale, daraasaddu waxa ay astesay in musharaxiinta raggu heli karaan garab xooggan, taageero dhaqaale iyo deyn ay ka heli karaan beelaha iyo ganacsatada, isla markaana dhaqaale ahaan diyaar u yihiin inay tartamaan si ka wanaagsan marka loo eego dumarka. Doorashooyinka 2021, bulshada rayidku kaalin firfircoona ayay ka qaadatay xoojinta ka qaybgalka haweenka dhan codbixin iyo dhan musharraximo, iyada oo loo marayo waxbarasho, tababbaro iyo taageero kale. Hase yeeshi, waxaa lagama maarmaan ah in la kordhiyo taageerada haweenka musharraxiinta ah si ay uga gudbaan caqabadaha dhaqaale iyo kuwa bulsho ee hortaagan.

Page 4 (4)

#### **Talooyin:**

- In dumarka la siyo tababbaro ku saabsan hoggaaminta, sida carbinta, maaliyadda siyaasadda iyo dhaqaale (qaaraan) ururinta.
- Maalgelin in lagu sameeyo barnamijyada tababbarka warbaahinta iyo madasha loogu talagalay haweenka musharraxiinta ah si ay u sameystaan xiriir, kalsoonni iyo xirfadaha ka-hadalka fagaarayaasha.
- Aqoonsiga qaabab cusub oo lagu buuxinayo farqiga u dheweeyaa maalgelinta siyaasadda haweenka, sida ilaha joogtada ah ee maalgelinta iyo/ama tababbarka iyo agabka waxtarka u leh haweenka dhanka xoojinta awoodda ay u leeyihii dhaqaale (qaaraan) ururinta iyo dhismaha shabakadaha isbahaysiga.
- Ka qaybgelinta haweenka ganacsiga gaarka loo leeyahay si loo hormariyo, korna loogu qaado ka qaybgalka haweenka ee siyaasadda.



PHOTO PDRC

## Rabshadaha ka dhanka ah Haweenka ee Doorashooyinka/Siyaasadda

Rabshadaha dumarka lagula kaco xilliga doorashada/siyaasadda (VAWE/P) waa dhibaato caalamka oo idil ka jirta, dad badan oo daraasadda lagu wareystay ayaana ku warbixiyey inay la kulmeen ama garanayaan dumar ku nool Puntland oo la kulmay tacaddiyo shakhsii ahaaneed ama kuwo la xiriira shaqadooda. Noocyada rabshadaha waxa ka mid ahaa falal handadaad, gacan-qaad, dhiig-miirasho, hanjabaad, bahdil, dhibaatayn, weerar loo mariyo baraha bulshada, iyo haween naftooda ku waayey. Haweenka musharraxiinta ah iyo madaxda bulshada ayaa u muuqda inay wajahaan khatarta ugu sarreysa, waxana ku xiga haweenka ka shaqeeya saxaafadda. Fikradda ah in dhibaataynta iyo xadgudubka lagula kaco haweenka musharraxiinta ay qayb "caadi" ah ka tahay siyaasadda, waxa ay wiiqaysaa awoodda lagu aqoonsan karo, waxna looga qaban karo dhibaatada. Muddadii ay socdeen doorashooyinka 2021-ka, tallaabooyin muhiim ah ayaa la qaaday si loo abuuro jawi sugar oo doorasho, iyada oo loo marayo qorshayn amni doorasho u nugul jinsiga, tusaale ahaan jirtaanka Xafiiska Xaaladda Haweenka.

Page 5 (5)

### Talooyin:

- Dejinta iyo taabbagelinta qorshe hawlgeinta haweenka ee dhammaan heerarka amni, sida saraakiisha iyo guddiga amniga doorashada.
- Si qumman in goobaha loogu qaybiyo jinsiga, isla markaana lagu dadaalo in goobaha codbixinta la geeyo kooxo amni oo ka kooban labada jinsi.
- Kocbinta tababbarka hawl Wadeennada amniga, gaar ahaan maareynta buuqa, shaqaaqooyinka la xiriira galmaada iyo arrimaha kale ee loo arko inay ku habboon yihiin tababbarka amniga ee u nugul jinsiga.
- U-kuurgelidda baahsanaanta shaqaaqooyinka ka dhanka ah jinsiga (VAWP) ee internet-ka iyo goobaha kale, isla markaana didibbada loo aaso qorshayaal fog oo looga hortagayo, loogana jawaabayoo falalka noocaas ah.
- Kordhinta adeegsiga Xafiisyada Xaaladda Haweenka iyo in dadweynaha la wada gaarsiiyo hawlaho iyo adeegyada uu qabto xafiisku iyo sida loola xiriiri karo.



Puntland  
Development &  
Research Center

